

KAADHKA NAAFADA MIDAWGA YURUB (EU) _Ka qaybqal gargaar

Kaadhka naafada ee Yurub (EU) sharcgiisu wuxuu ka hirgalay wadanka Finland bishii Juun 2018. Khaadhka naafadu wuxuu horumariya sinnaanta, kaasoo fudaydinaaya ka mid noqoshada iyo dhaqdaqaqa dadka naafada ah ee Yurub. Kaadhkani wuxuu macmiisha u fudeydinaya wakhtiyada firaaqada ee uu u baahdo in loo waco marka uu caawimo iyo taageero u baahdo.

Kaadhka naafada waa qalab loogu talagalay isgaadhsinta, ka qaybgalka iyo khibradaha macaamiisha ee wanaagsan

Kaadhkan isticmaalkiisu waa ikhtiyaari isticmaalaha iyo adeeg bixiyahaba. Kaadhka qiimuhiisu waa 10 euro waxaana la isticmaali karaa 10 sanno. Adeeg bixiyaasha waxay iska diiwaan gelin karaan bartilmaameedka Vammaiskortti bogga www.vammaiskortti.fi. Adeegga kaadhka naafada ujeeddada, waxaa la doonaynaa in la horumariyo dadka u baahan caawimaadda adeegga si ay u heli karaan taakulo.

Yaa heli kara kaadhka naafada ee EU?

Waad codsan kartaa kaadhka naafada ee EUd, hadii aad haysatid go'aan hore oo caawinimo ama adeega ah kaasoo weli wakhtigiisu shaqaynaayo, waad ku heli kartaa khaadkaas. Helitaanka kaadhkaas ma u baahnid in go'aan kale cusub oo lagaa gaadho.

Waxaad heli kartaa kaadhka naafada kuwo ka mida gunnadda ama adeegyada hoos ku xusan:

Gunnooyinka Kelada:

- Gunnadda naafada ee da'doodu ka yar tahay 16 sano
- Gunnadda naafada da'doodu 16 sanno iyo wixii ka weyn
- Qofka qaata gunnadda hawlagabka naafada
- Adeegga turjumaanka ee maqalka naafada (A)
- Adeegga turjumaanka ee maqalka iyo aragga naafada (A)
- Adeegga turjumaanka ee dadka hadalka naafada ka ah (A)

Go'aamo kale:

- waxqabadka hawl maalmeedka ee sharciga adeegga naafada sida uu dhigayo sharciga daqdaqaqa ee daryeelka badbaadada
- bulshada (ee loo yeedho go'aanka adeegga gaadiidka)
- adeegga gaadiidka ee waafaqsan Sharciga, adeegyada naafada
- kaadhka naafada araga (A)
- heshiiska daryeelka qoyska (kaadhka naafada waxaa loogu
- talagalay qofka qoysku daryeelaan) (A)
- adeeg galbin(A)
- sharciga adeegga naafada ee adeega guryaha, sida uu dhigaayo (A)
- kaalmada shaqsi ahaaneed (A)
- Barnaamijka daryeeka gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha go'aanka (A)
- Go'aanka taageerada khaaska ah (A)

(A) Waaad kartaa khaadka A kaasoo ah oo lagu calaamadinayo caawiye Voit saada korttiisi A- eli avustajamerkinnän. Sen avulla voit halutessasi kertoa, että tarvitset mukaasi avustajan tai tukihenkilön.

Sidee ayaa loo codsado kaadhaka naafada ee EU?

Kaadhma naafada codsigisu wuxuu u qaybsamaa laba marxaladood:

1. Dalabka kaadha naafada ee EU, da waxaa loo baahanyahay (foomka VK1) waa la buuxbuuxinayaan isagoo lifaaqyadiisa watana waxaa la geynayaan Kela, da. Xafiiska Kela, da ayaa hubinaya inuu qofkani xaq u leeyahay kaadhka iyo in loo calamadiyo calaamada A. Dalabka codsiga waxaa laguu soo dirayaan halka aad codsiga ka samaynaysid linki internetka ah waxaana laguugu soo dirayaan limelyka.
2. Qofka codsanaya kaadhka naafada ama qofka ka caawinaya dalabka codsiga way geli karaan linkiga internetka lagu soo diray iimeylka. Sistamka internetka ayaad codsiga dalabka inta ka dhiman ku buuxbuuxin. Markaad halkaa maraysid hubi foomka warbixinta aad ku buuxbuuxisay ee kaadhka lagu soo qoraayo, kadibna ku lifaaq sawirka codsadaha lacagta waxaa lagu bixinayaan bangiga internetka. Haddii aad u baahatid caawimo, tusaale ahaan in warqada biilka lagu bixiyo, waxaad la xidhiidhi kartaa xafiiska kaadha naafad

Haddii aadan nidaamta gelin afar(4) bilood gudahod, maclummaadkaaga si toos ah ayuu kaaga tuurayaa nidaamka . Warbixinta muhimka ah ee la xidhiidha habka codsiga waxaad ka heli kartaa ciwaanka www.vammaiskortti.fi

Xafiiska kaadhka naafada

Wixii warbixin dheerada ee la xidhiidha kaadhka naafada yurub, waxaad ka heli kartaa xafiiska kaadhka naafada.

Adeegga macaamiisha: Tel. 0800-122533 (waa lacag la'aan Finish iyo Ingiriisi) waxay furan yihiin Isniinta iyo Talaadada 9 subaxnimo ilaa 12 duhurnimo iyo Arbacada laga bilaabo 12 duhurnimo ilaa 3 galabnimo.

limayl: www.vammaiskortti@kvps.fi

Bogagga shabakadda: www.vammaiskortti.fi

Facebook/vammaiskortti

Instagram@vammaiskortti



Xarunta taageerada ee ajanabiga naafada ah ee Hilma

Nambarka telefoonka heeganka: 044 9016441

Saacadaha adeegga Isniinta - Khamiista 10 subaxnimo – 3 galabnimo